

## Mashruuca Hagaajinta Waddada 23rd Avenue

### Qeybta 1aad dhismaha waxay bilaaban doontaa horaanta 2015

Laga bilaabo horaanta 2015, Waaxda Gaadiidka Seattle (Seattle Department of Transportation) (SDOT) waxay bilaabi doontaa dhismaha hagaajinta 23rd Avenue inta u dhexeyso E John Street iyo S Jackson Street. Tani waa qeybta kowaad mashruuca si loo hagaajiyo ammaanka iyo dhaqaaqa wadeyaasha baabuurta, dadka lugeeya, baskiilada iyo kuwa isticmaala gaadiidka dadweynaha. SDOT waxay dib u handasi doontaa qeybtaan 23rd Avenue, taasoo laga dhigi doono saddax leen halka ay hadda ka tahay afar leen - hal leen oo dhinac kasta u socdo iyo leen dhexe oo leexad ah.


### Waxaa la fillan kartid

Waxaa la filaa in dhismaha gaaro qiyaas ahaan 20 bilood, loo qeybiyay saddax qeyb oo laga shaqeeyo si loo yareeyo saamaynta ay ku leedahay ganacsiga u dhaw, bulshada iyo dadweynaha safarka ku mara.

Si loo yareeyo saamaynta, waxaan dhismaha u qeybin doonaa saddax marxalad oo laga shaqeeyo. Deriska waxay fillan karaan saamaynta soo socoto ay baabuurta ku leedahay waqtiga dhismaha qeyb kasta:

- Si buuxdo ayaa loo xeri doonaa baabuurta u socoto waqooyi iyo wadooyinka lagu leexiyo baabuurta
- Waa la yareyn doonaa tirada leemanka baabuurta u socoto koofur
- Waxaa dhici karto in loo baahdo in marmar habeenkii la shaqeeyo
- Waa ka xeri doonaa dhowr ka mid ah isgoysyada muhiimka ah
- Leexadyada guryaha waxaa la xeri doonaa muddo gaaban iyo jidad ku meel gaar ah loo sameeyo dhinacyada lagu socdo
- Si ku meel gaar ah, iyo muddo gaaban, ma jiri doonto meel la dhigto baabuurta dhinacyada wadooyinka



Wijiga 1aad



## SI BUUXDO AYAA LOO XERI DOONAA JIDADKA U JEEDA WAQOYI IYO JIDADKA KU MEEL GAARKA

Si loo hubsado amaanka wadeyaasha iyo dadka lugeeya, loona siiyo shaqaalaha boos ku filan ay ku dhamaystiraan shaqadooda, baabuurta u socoto waqooyi waxaa lagu leexin doonaa Martin Luther King Jr. Boulevard. Baabuurta u socota koofur waa la dayactiri doonaa, inkastoo ay u badan tahay in la yareeyo oo laga dhigo hal leen.

Waxaa la fillaa in shaqada Qeybta A qaadato qiyaas ahaan 10 bil, Qeybta B in ay qaadato 5 bil, iyo Qeybta C in ay qaadato 5 bil. Waxaan soo dhaweyneynaa sabarka aad yeelatay anaga oo toosina socodka baabuurta. Waxaan filaynaa in todobaadyada hore, jidadka ku meel gaarka ah ee wiji kasta adkaan doonaan inta wadeyaasha kala qabsan doonaan wadooyinka cusub.





## Xajinta ammaanka xaafadaada iyo dhaqaaqa waqtiga dhismaha

Si leysugu miisaamo baahida kala duwan ee dhamaan inta ka shaqeyso, in lagu noolaado iyo lagu cayaaro meel u dhaw mashruuca, waxaan aqoonsanay qalab aan isticmaali karno waqtiga dhismaha si aan u maamulno baabuurta iyo u xajino ammaanka dadka ku sugan wadooyinka xaafadda. Waxaa ka mid ah:

### Dhaqaaqa



#### Isbaddalada nalalka ku shaqeyso waqtiga

Waa la habeyn doonaa nalalka 23rd Avenue iyo Martin Luther King Jr. Boulevard si loo xoojiyo dhaqaaqa isgoysyada waaweyn.



#### Xanibaadda leexadka bidixda

Isgoysyada waaweyn ee ku yaala xaafadda, waxaa la hirgelin doonaa xanibaadda leexadka bidixda si loo yareeyo baabuurta meesha ku badata loona hagaajiyo socodka baabuurta.



#### Calaamadda

Waxaa la adeegsan doonaa calaamadaha muujiya jihada si dadweynaha safra loo ogeysiyo hawlaha dhismaha iyo jidadka ku meel gaarka ah. Xaafadda oo idil, waxaa kaloo dhici karta in la adeegsado calaamadaha baabuurta ku toosiya jidadka kale, si ay u gaaraan SR 520 iyo I-90.



#### Jidka Cagaaran Xaafadda (Neighborhood Greenway)

Waxaa la meeleyn doonaa Jidka Cagaaran Xaafadda Bartamaha (Central Area Neighborhood Greenway) ka hor inta aan la dhisin waddada. Jidka cagaaran wuxuu dadka siin doonaa meel ay baskiilka dhigtaan kuna maraan socod jidka la daggan yahay. Waxaad jidka ka fiirisaa khariidada ku taal dhinaca hore.

If you need this information translated, please call (206) 733-9990.

Si necesita traducir esta información al español, llame al (206) 733-9990.

如果您需要此信息翻译成中文 請致電 (206) 733-9990.

Kung kailangan mo ang impormasyon na ito na nakasalin sa Tagalog mangyari lamang na tumawag sa (206) 733-9990.

Odeeffannoon kun akka siif (206) 733-9990.

## PROJECT INFORMATION & CONTACT

[www.seattle.gov/transportation/23rd\\_ave.htm](http://www.seattle.gov/transportation/23rd_ave.htm)

[23rdAveCorridor@Seattle.gov](mailto:23rdAveCorridor@Seattle.gov)

Maribel Cruz, Outreach Lead

(206) 684-7963

### Ammaanka

#### Daraasaadda lagu sameeyo xawaaraha iyo tirada baabuurta

SDOT waxay fullin doontaa daraasaad ka hor inta aan la bilaabin dhismaha si raad looga reebo xaaladaha jira loona aqoonsado arrimaha ammaanka ee soo bixi kara waqtiyada la isticmaalo jidadka ku meelgaarka ah ee u socda waqooyi.



#### Calaamadaha Baabuurta Xaafadda Keliya iyo qalabka lagu cabbiro xawaaraha

Sida ku saleysan natiijada ka soo baxda daraasaadka xawaaraha iyo tirada baabuurta, waxaa dhici karto in calaamadaha Baabuurta Xaafadda Keliya lagu suro jidadka laga yaabo in ay soo maraan baabuurta xaafadda goysa.



#### Saraakiisha boliiska labbisan (Uniformed police officers) (UPOs) iyo calanleyda

UPOyada waxay ku sugnaan doonaan isgoysyada muhiimka ah si ay u kaalmeyaan maamulka baabuurta xaafadaha dhismaha ka socdo. Waxaa kaloo dhici karta in la adeegsado shaqaalaha calanka.

Nếu quý vị cần thông tin này chuyển ngữ sang tiếng Việt xin gọi (206) 733-9990.

የዚህን መረጃ ትርጉም ከፈለጉ፣ በዚህ ስልክ ቁጥር ይደውሉ፡ (206) 733-9990.

දළዘ. ሐበሬታ ትርጉም እንተደለኹም፣ በዚ. ቁጥር ስልክ ይደውሉ፡ (206) 733-9990.

당신이 번역이 정보를 필요로하는 경우에, (206) 733-9990로 전화 해주십시오.

